

Agabka Bulshadda Gobolka New York

Isha Hagaida ee Dadka Muhaajiriinta Reer New York
Siteember 2021



Isbahaysaiga Laanta Socdaalka New York waxay samaysay agan si loo siiyo ilo xubnaha bulshadda iyo shuraakadayada iyo gaashaan buurtayada la shaqeeya iyaga. Waxaa loo cusboonaysiiyaa bile iyaddoo ku salaysan isbeddelada sharciyaga iyo xeerarka.

Tusmadda

- Caafimaadka **3**
- Socdaalka **5**
- Waxbarashadda **7**
- Dimuqraadiyada **8**
- Dhaqaalaha **9**
- Garo Xuquuqdaada **11**
- Dembiyada Nacaybka ah **12**
- Ilaha NYS **13**

Caafimaadka ^{1/2}


Markasta oo in badan oo reer New Yorkers ay istalaalayaan ayaa waxaa sii wanaagsanaanaya fursadaheena aan ku joojin karno faafitaanka cudurka COVID-19. Adiga qaybtaada ka qaado adiga oo maantaba isa soo tallaala oo maantaba u sheeg qof kasta oo aad taqaan 12 jir iyo ka weyn inay iyaguna sidaas oo kale sameeyaan.

Tallaalka cudurka COVID-19 waa BILAASH iyadoon loo eegeyn xaaladdaada soo galootinimo ama haddii aad caymis caafimaad aad qabto iyo in kale.

Wixii ka soo cusboonaaday COVID-19

- Taariikhdu markay ahayd 23ka Agoosto, 2021, Waaxda FDA waxay ku dhawaaqday inay ansaxisay tallaalka Pfizer in loo isticmaalo ka hortagga cudurka COVID-19 oo ay qaadan karaan shaqsiyaadka 16 jirka iyo kuwa ka wayn.
- Guddoomiyaha Hochul ayaa waxay ku dhawaaqday dhowr shuruudood oo ah in dadka oo dhan wada xirtaan maaskaro si looga ilaaliyo dadka reer New York inay qaadaan cudurka nooca kala duwan ee Delta ee aadka u faafa oo dhawaanahan sara u kaca cudurka COVID-19 ee gobolka oo dhan. Daboolida wejiga ayaa hadda shuruud la isaga dhigay:
 - Dhammaan dhismayaasha iskuulka inta lagu jiro saacadaha waxbarashada iyo hawlaha manhajka ka baxsan
 - Xarumaha xanaanada ilmaha ee ay dowladdu maamusho ee loogu talagalay carruurta ay da'doodu tahay 2 iyo ka weyn iyo dhammaan shaqaalaha iyo booqdayaasha
 - Urursada barnaamijyada iyo xarumaha ruqsad haysta, diiwaangashan, shaqeynaya, shahaado siiyay ama oggolaaday Xafiiska Caafimaadka Dhimirka, Xafiiska Adeegyada iyo Taageerada Balwadaha, Xafiiska Dadka Naafada Korriinka, Xafiiska Adeegyada Carruurta iyo Qoyska iyo Xafiiska Kaalmada Ku-meelgaarka iyo Naafada .
- Shaqaalaha daryeelka caafimaadka waxay fariin qoraal ay soo qori karaan "NYFRONTLINE" ku soo diri karaan [741-741](tel:741-741) si ay u helaan adeegyada taageerada niyada 24/7 saacadood.

- Dadka reer New York waxay soo wici karaan Khadka Taageerada Niyada ee COVID-19 [1-844-863-9314](tel:1-844-863-9314) si ay u helaan la talin dhanka caafimaadka dhimirka.
- Laga bilaabo 17ka Agoosto, dadka ka weyn 12 sanoo waxay u baahan yihiin inay tusaan caddayn ugu yaraan hal qiyaas tallaalka COVID-19 oo loogu talagalay cuntada gudaha, jirdhiska gudaha, iyo madadaalada gudaha Magaalada New York. Wax badan ka baro nyc.gov/keytonyc.



Tallaalka COVID-19

- Dhammaan shakhsiyaadka da'da 12 jirka ah iyo kuwa ka weyn ee ku nool Mareykanka waxay xaq u leeyihiin inay qaataan tallaalka COVID-19.
 - Laga bilaabo taariikhda markay ahayd 16ka Agoosto, 2021, dadka reer New York ee qaba nidaamyada difaaca jirka ee liita ayaa hadda heli kara tallaalkooda saddexaad ee COVID-19.
 - Guddoomiye Hochul waxay ku dhawaaqday olole [#VaxtoSchool](https://twitter.com/VaxtoSchool) si loo wado heerarka tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay ardayda reer New York ee jira da'da iskuullayda: ny.gov/VaxtoSchool
 - Inta lagu jiro oo ay socoto hawsha tallaalka, dadka reer New York waa inay sii wadaan xirashada maaskarada marka ay habboon tahay oo ayna raacaan dhammaan tilmaamaha kale ee caafimaadka.
- Tallaallada ayaa si baahsan ayaa waxaa looga helaa farmashiyeyaasha, waaxyada caafimaadka ee maxalliga ah, rugaha caafimaadka, Xarumaha Caafimaadka ee Federaal ahaan u Qalma, iyo meelo kale oo Gobolka New York ku baahsan.
- Booqot [Vaccines.gov](https://www.vaccines.gov) ama wac [1-800-232-0233](tel:1-800-232-0233) (TTY [888-720-7489](tel:888-720-7489)) si meel kuu dhow aad balan uga samaysato.
- Waaxyo caafimaad oo badan oo degmada ka jira ayaa fidiya rugo tallaalka oo la iska tago oo aan ballan loo baahnayn ama guriga lagugu imaanayo. Ka hel macluumaad la xiriiirka ee waaxda caafimaadka ee maxaliga nysacho.org/directory.

Caafimaadka ^{2/2}

Baadhitaanka NYC iyo Trace Corps

- Baadhitaanka NYC & Trace Corps waa qorshaha caafimaadka dad waynaha si loola dagaalamo khatarta COVID-19.
- Baadhitaanka: Qaado baadhitaanka COVID-19 iyo baadhitaanka si loo ogaado haddii lagu gaadhsiiyay fayraska. Baadhitaanadu waa BILAASH, qarsoodi iyo badbaado. Wax ka badan 200 goobaha baadhitaanku way furan yihiin.
- Raad raaca: Ka jawaab wicitaanka Xidhiidhka Raad raacayaasha. Waxay taageero siiyaan reer New York oo laga helo COVID-19 iyo xidhiidhkooda dhow.
- Feejignow: Ilaali Naftaada iyo Kuwa aad Jeceshahay. Si badbaado isugu go'doomo qol huteel, bilaasha ah oo raaxo leh oo habboon aama xaga guriga.
- Waxbadan ka baro nyhealthandhospitals.org/test-and-trace

Caymiska Caafimaadka

- Muddada Diiwaangelinta Furan waxaa la kordhiyay ilaa Diisambar 31, 2021. Dadka reer New York waxay codsan karaan daboolida dhexda Caafimaadka Gobolka New York, Goobta Suuqaa Qorshaha Caafimaadka Rasmiga ah ee New Yorka, ama si toos ah dhexda caymiyayaasha.
- Ka codso onlaynka nystateofhealth.ny.gov, telefoon ahaan [1-855-355-5777](tel:1-855-355-5777), ama ku xidhmida caawiyaha diiwaangelinta oo bilaash ah.



Xeerka NY HERO

- Xeerka Caafimaadka iyo Xuquuqda Aasaasiga ah ee New York waxaa la saxiixay oo sharci noqday 5ta bisha Maajo, 2021. Wuxuu Waaxda Shaqada ee Gobolka New York uga baahan yahay inay abuurto Qorshayaasha Bandhigga Cudurrada Hawada ee Model-ka si shaqaalaha looga ilaaliyo inuu soo gaaro cudurrada sida cudurka COVID-19.
- Taariikhda markay ahayd 6da bisha Sebtember, 2021, Guddoomiye Hochul waxay ku dhawaaqday Xeerka HERO oo ah in cudurka COVID-19 yahay cudur faafa oo hawada ku hoos ku dhex jira. Magacaabistan waxay u baahan tahay in dhammaan shirkaddaha loo shaqeeyo/loo-shaqeeyayaasha waa inay hirgeliyaan qorshayaasha badbaadada goobta shaqada.
 - Qorshayaasha ay qaateen loo-shaqeeyayaashu waa inay wax ka qabtaan tallaabooyin badan oo badbaado ah, balse kuma koobna oo kaliya: baaritaannada caafimaadka shaqaalaha, maaskarada iyo shuruudaha masaafo ka fogaanshaha bulshada, nadaafadda goobta shaqada, borotokoolka nadiifinta goobta shaqada, qawaaniinta karantiil, iyo dhisidda tikniyoolajiyadda hawada.
 - Loo-shaqeeyayaasha waxaa laga rabaa inay qorshahooda badbaadada shaqada u qaybiyaan dhammaan shaqaalaha kuna dhajiyaan meel laga arki oo caan ah goob kasta oo shaqada ah.
 - Intaa waxaa dheer, sharcigu wuxuu shaqaalaha ka ilaaliyaa aargoosi oo loo-shaqeeyaha waa inay raacaan shuruudaha qorshayaashan, soo sheegaan tabashooyinka ku saabsan hirgelinta sharciga ee loo -shaqeeyaha, ama diido inay shaqeeyaan.
- Dhammaan loo -shaqeeyayaasha iyo shaqaalaha gaarka ah way cayiman yihiin.
- Qorshayaasha moodeelka iyo wixii ka soo cusboonaada hirgelinta Xeerka HERO waxaa laga heli karaa dol.ny.gov/ny-hero-act.

Socdaalka ^{1/2}

Taariikhdu markay ahayd 31ka bisha Agoosto, ciidamadii ugu dambeeyay ee Mareykanka ayaa si rasmi uga soo baxay dalka Afghanistan, iyagoo si rasmi ah u soo afjaray dagaalkii ugu dheeraa taariikhda Mareykanka. U-doodayaashu waxay sii wadaan inay ka jawaabaan mashaakilaadka bina -aadamnimo ee ka aloosan Afghanistan iyadoo xulafada Afgaanistaan iyo kuwa kale ee ka soo cararaya cadaadiska ay nabadgelyo u raadsadaan dibadda. Isla mar ahaantaana, Gobolka New York wuxuu bilaabay inuu soo dhaweeyo qaxootiga reer Afgaanistaan iyo kuwa tijaabada ku jira.

Ilaha loogu talagalay qaxootiga reer Afgaanistaan iyo kuwa tijaabada ku jira

- Haddii aad qabtid wax su'aalo ku saabsan sida loo codsado Fiisaha Muhaajiriinta Gaarka ah (SIV), Barnaamijka Ogolaanshaha Qaxootiga ee Maraykanka Mudnaanta 2aad Magacaabista Muwaadiniinta Afgaanistaan, ama kuwa tijaabada bani'aadamnimo, la tasho qareen socdaal ama wakiil DOJ aqoonsan yahay.
- Khayraadka loogu talagalay oggolaanshaha qaxootinimada, kuwa tijaabada ku jira ee bani'aadamnimo, iyo daadgureynta:
 - Mashruuca Caawinta Qaxootiga Caalamiga ah (IRAP) wuxuu u ururiyay kheyraadka reer Afgaanistaan, saaxiibadood, iyo saaxiibbada laga yaabo inay ka raadiyaan macluumaad ku saabsan dalabyada socdaalka support.iraplegalinfo.org/hc/en-us/articles/4406192539924.
 - Ilaha loogu talagalay dadka reer Afgaanistaan ee u baahan daadgureynta: bit.ly/2W0FqM
- Ilaha dib-u-dejinta:
 - Gobolka New York – I-ARC Mashruuca Dib-u-dejinta Afgaanistaan: immigrantarc.org/afghanistan
 - Magaalada New York – oo ay ku jirto khariidadda adeegyada magaalada ee lagu heli karo Dari iyo Pashto: nyc.gov/afghanistanresources
 - Galbeedka New York – Buffalo United oo loogu talagalay Daadgureynta reer Afgaanistaan: wnyrac.org
 - Albany/Caasimada gobolka – Liiska Ilaha: bit.ly/3kvWRZd
 - Deegaanka Ithaca/Finger Lakes – Liiska Ilaha Cornell Afghanistan: bit.ly/3CwfFxy


Codsiyada bilowga ah ee DACA waa la hakiyay

- Taariikhdu markay ahayd 16ka bisha Luulyo, 2021, Garsoore maxkamad federaali ee Texas Garsoore Hanen ayaa soo saaray go'aan ah in DACA aysan ahayn barnaamij sharci ah. Go'aankaasi wuxuu DHS ka hor istaagayaa inay ansixiso arjiyada cusub ee DACA ee ugu horreysa. Ilaa iyo hadda, DHS waxay sii wadi kartaa inay oggolaato arjiyada cusboonaysiinta DACA.
 - Haddii hadda aad haysato DACA, sharcigaaga weli waa ansax.
 - Haddii DACA -gaagu dhowaan uu dhoco, hadda cusboonaysii!
 - Haddii aad markii ugu horeysay u gudbisay USCIS codsi DACA ah oo aan weli la aqbalin, codsigaas waa la joojin doonaa. La ma socod siin doono ilaa ogeysiis dambe.
- Dacwad ayaa socota, sidaa darteed waxaa suurtoagal ah in isbeddello dheeraad ah lagu sameeyo barnaamijka.

Dhagaysiga Maxkamadda Heerka Socdaalka

- Laga bilaabo 6da Luulyo, 2021, dhammaan maxkamadaha ayaa qaban doona dhageysiyo xaddidan.
- Haddii aadan ka helin ogeysiis maxkamadda in dhageysigaagii dib loo dhigay, waa inaad filataa in dhageysiga la qaban doono sidii markii hore loogu qorsheeyay. Waxaad walibana ka fiirin kartaa bogga macluumaadka kiiska ee EOIR halkan portal.eoir.justice.gov/InfoSystem ama wac [1-800-898-7180](tel:1-800-898-7180) si aad u ogaato taariikhda iyo wakhtiga dhageysigaaga xiga.





Xaaladda Ilaalinta Ku meelgaarka ah (Temporary Protected Status) way dhowrsan tahay oo waxaana la gaarsiiyay dalal cusub

- Dowladda Biden ayaa dhawaan ku dhawaaqday TPS loogu talagalay muwaadiniinta Venezuela, Burma/Myanmar, iyo Haiti.
 - Shakhsiyaadka ayaa dalban kara Venezuela TPS illaa 9ta Sebtember, 2022.
 - Shakhsiyaadka ayaa dalban kara Burmese TPS illaa 25ka Nofeember, 2022.
 - Shakhsiyaadka ayaa codsan kara TPS ta Haitian ka ilaa 3da Febraayo, 2023
- DHS waxay kordhisay oo ay dib u qaabaysay TPS ta loogu talagalay dadka Soomaalida ilaa 17ka bisha Maarso, 2023.
- DHS waxay kordhisay oo ay dib u qaabaysay TPS ta loogu talagalay dadka reer Yemen ilaa 3da bisha Maarso, 2023.
- TPS ayaa loo kordhiyay dadka reer Koonfurta Suudaan ilaa 2da bisha Maajo, 2022.
- Waaxda DHS waxay si toos ah ay u fidinaysaa ansaxnimada dukumiintiyada la xiriiira TPS ee ka-faa'iideystayaasha sida ay hoos timaado ama iyadoo la raacayo tilmaamaha TPS ee El Salvador, Haiti, Nicaragua, Sudan, Honduras, iyo Nepal illaa 31k Diseembar, 2022, laga bilaabo taariikhda uu dhacayo hadda 4ta Oktoobar, 2021.
- DHS waxay kordhisay oo ay dib u qaabaysay TPS ta loogu talagalay dadka reer Suuriya ilaa 30ka bisha Siteembar, 2022.
- Shakhsiyaadka ka soo jeeda wadamada Burma/Myanmar, Soomaaliya, Suuriya, Venezuela, Haiti, ama Yemen, ee markii ugu horeysay codsanaya TPS, waxay hadda soo gudbin karaan Foomka I-821, Codsiga Xaaladda Ilaalinta Ku-meelgaarka ah (Temporary Protected Status), oo ay qatkan internetka ayay ku soo gudbin karaan uscis.gov/i-821.
- Ka fiiri uscis.gov/TPS si aad u hesho wararkii ugu dambeeyay.


Xaddiga qaxootiga oo kordhay

- Maamulka Biden/Harris ayaa ku dhawaaqay 3da bisha Maarso, 2021 inay kordhin doonaan ugu bdanaan tirada qoxootiga sannadkaan la gaadhsiiin doono 62, 500, iyada oo laga soo kordhin doono ugu badanaantii ahayd 15,00 ee maamulkii Trump.
- Hase yeeshe, awgood hoos u dhacyo ku yimid hab-socodsiintii arrimaha qaxootiga ee dalka dibaddiisa iyo ilaha kheyraadka dib u dejinta Mareykanka, uma badna inuu Mareykanku awoodi doono inuu soo galiyo tiradaas sannadkan.

Ahmiyadaha cusub ee dhaqan gelinta waxay xadidaan cida ay ICE yoolka sarayso.

- Maamulka Biden–Harris waxay soo saareen tilmaanta cusub ee dhaqan gelinta socdaalka, ay ku jiraan xidhiitanada iyo xabsi ku hayn.
- Kumaa ahmiyada loo saarayaa xoojinta ICR.
 - Tani jidh ahaan uma jirto gudaha Maraykanka ka hor Noofambar 1, 2020
 - Kuwan dowladdu uga fekerito inay khatar ku yihiin amniga qaranka ama ay ka shakisan tahay inay galeen argagixiso ama basaasid.
 - Kuwan laga soo daayay xabsiga falka dembiyaa taariikhda ama ka dib Janaayo 20, 2021, oo lagu helay dembiga "dembiyaa halista ah" oo khatar ku ah badbaadada dad waynaha
- Haddii saddexda xaaladood ee kor ku yaal aanu midkoodna adiga ku khusaynin, oo aad hadda ku jirto habraac masaafurin, waxa laga yaabaa inaad uqalanto nooc gargaar oo loo yaqaan gacan-u-bannaani xeer-ilaalined (prosecutorial discretion).
- Waxaad weyddiisan kartaa inuu qareenkaagu sahmiyo ka suurtagalnimada gacan-u-bannaani xeer-ilaalined qareenka dowladda ee loo xilsaaray kiiskaaga. Haddii aadan u haysan wakiillnimo sharciyeed kiiskaaga, waxaad weyddiisan kartaa qareenka dowladda marka la joogo dhageysigaaga haddii aad uqalanto gacan-u-bannaani xeer-ilaalined iyo in kale. Si aad u hesho talo sharci oo aad ku ogaanayso haddii aad qareen heli karto:
 - Dadka Degen NYS: soo wac Xafiiska khadka tooska ah ee Maraykanak Cusub 1-800-566-7636
 - Dadka Degen NYS: soo wac 311 oo dheh "ActionNYC" Ay magaaladu Maalgeliso, bilaash ah, iyo caawimada sharciga ah ee badbaadada ah.

Waxbarashadda



Ilaaha Dib ugu Laabashada Dugsiga 2021–22, qoysaska qaba ardayda baranaysa Ingiriisiga, iyo gelitaanka kuleejka ee ardayda aan sharciga haysan ayaa hadda heli kara.

Iskuul ku Laabashada 2021–22

- Waaxda Waxbarashada ee Gobolka New York ayaa soo saartay hage kooban, oo ku salaysan hagitaan ka yimid waaxda CDC iyo Akadeemiyadda Carruurta ee Maraykanka, si loo caawiyo dugsiyada iyo degmooyinka marka ay isku diyaarinayaan sannad dugsiyeedka cusub. Halkan ka eeg hagaha: bit.ly/3CCSp13.
- Halkan ka fiiri warqadda soo-dhaweynta NYSED ee qoysaska: conta.cc/3tnktCc.
- Guddoomiyaha goboka Hochul waxay ku dhawaaqday sharci guud oo maaskaro xirasho ah oo loogu talagalay qof kasta oo jooga dugsiyada iyo basaska dugsiya, iyadoon loo eegin heerka tallaalka.
- Dhammaan macallimiinta, maamulayaasha, iyo shaqaalaha kale ee dugsiya waa in laga qaadaa baaritaanka COVID-19 toddobaadle haddii aysan haysan caddayn ah in la tallaalay.

Ilaaha loogu talagalay qoysaska ardayda baranaysa Ingiriisiga

- La socodsiintu waxay muhiim u tahay hubinta in Bartayaasha Luqadda Ingiriisiga (ELLs) si wanaagsan loogu adeego. Waaxda Waxbarashada ee Gobolka New York waxay abuurtay Sharciga Xuquuqda Waalidka ee Barnaamijka Barashada Luqadda Ingiriiska kaas oo soo koobaya xuquuqda muhiimka ah ee ku saabsan helitaanka waxbarashada iyo barnaamijyada ELL -yada iyo waalidkood: bit.ly/3EJdOTd
 - Macluumaadka waxaa lagu soo qoray luqaddaha Carabi, Bengali, Shiine (La fududeeyay), Shiine (Asalka), Ingiriis, Faransiis, Haitian Creole, Karen, Nepali, Ruush, Isbaanish, Yukreeniyaan, iyo Urdu.
 - Waxaad wici kartaa Khadka Waalidka ELL [800-469-8224](tel:800-469-8224) haddii aad qabtid su'aalo ama walaacyo.

Xeerka NYS DREAM Act

- Senatoore José Peralta Sharciga Gobolka New York wuxuu ardayda aan sharciga aan haysan iyo ardayda kaleba wuxuu siinayaa inay helaan deeqaha ay NYS maamusho iyo deeqaha waxbarasho ee kaabaya qarashkooda tacliinta sare.
- Dhammaan wixii xog ah ama sida loo codsado, booqo hesc.ny.gov/dream

Ilaaha helitaanka kulliyadda ee loogu talagalay ardayda aan sharciga haysan

- Hagaha cusub ee soo-galootiga ah ee xog-ogaalka ah wuxuu siiyaa ilo iyo macluumaad ardayda dugsiya sare iyo kulliyadda ee aan diiwaan -gashanayn, labadaba DACA iyo la'aanteedba, si looga caawiyo inay gaaraan go'aanno xog-ogaal ah oo ku saabsan mustaqbalkooda iyo inay helaan aaladaha ay u baahan yihiin si ay naftooda ugu doodaan: informimmigrant.com/guides/students/
- Best Colleges ayaa dhawaan daabacay hage kulliyadeed oo loogu talagalay DACA iyo ardayda aan sharciyaysnayn ee ku saleysan cusboonaysiinta ugu dambaysay ee DACA: bestcolleges.com/resources/undocumented-students/college-guide/

Cashuur Naqidda Ilmaha

- Laga bilaabo 15ka Luulyo, 2021, waalidiinta intooda ugu badan ee leh carruurta ka yar 18 sano ayay u bilaaban doontaa inay ka helaan dowladda biximo bil kasta ah iyada oo loo maro Cashuur Naqidda Ilmaha, oo loogu talagalay in lagu caawiyo qoysasku inay awoodaan kharashyada maalinlaha ah ee korinta ilmaha.
- Ilmahaaga ama kugu tiirsanahaaga ayaa ah inuu lahaado Lambarka Sooshal Sekuuritiga oo uuna ahaado muwaaddin Mareykan, u dhalasho Mareykan, ama yahay deggane joogto ah.
- Waalidiinta ku sheegta canshuur celinta inay carruurtooda ku tiirsan yihiin ayaa heli doona dheefta xitaa haddii aanay kasban wax dakhli ah ama aan lagu lahayn cashuur.
- Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah ama si aad u ogaato u qalmitaankaaga, booqo irs.gov/childtaxcredit
- Deggenyaasha NYC:
 - Adeegso aaladda ACCESS NYC si aad u ogaato u qalmitaankaaga: access.nyc.gov/programs/child-tax-credit-ctc
 - Qoysaska aan xareynin canshuurhoodii sannadihii 2019 ama 2020 ayaa isticmaali kara diyaarinta cashuurbixinta lacag la'aanta ah (NYC Free Tax Prep) si ay ugu xereeyaan lacag la'aan cashuur celintii 2020 haddii ay kasbadeen \$68,000 ama in ka yar: nyc.gov/taxprep

Dimuqraadiyada

Dhammaan xubnaha bulshadda ee uqalma inay codeeyaan waxaa lagu dhiirigelinayaa inay codeeyaan doorashooyinka soo socda.

Doorashooyinka Guud: Noofambar 2, 2021

- 8ka Oktoobar: Waqtiga kama dambaysta ah si aad isugu diiwaangeliso si aad u codeyso
- Ma hubtid haddii aad horeyba diiwaangashan tahay iyo in kale? Ka hubi xaaladdaada diiwaangelin voterlookup.elections.ny.gov.
- Haddii si sifeeyo si sharaf leh looga soo joojiyey lagaa soo saarey Militariga Mareykanka ama aad noqoto Muwaadin Mareykan ah oo qaatay dhalashada wixii ka dambeeya 8da Oktoobar, waxaad iska diiwaan gelin kartaa Guddiga Doorashada ilaa 23ka bisha Oktoobar.
- 18ka Oktoobar: Maalintii ugu dambaysay ee Guddiga Doorashooyinka si loogu helo arjiga cod-bixinta maqnaanshaha boostada, bogga internetka, iimayl ama fakis.
- 23ka–31ka Oktoobar: Codbixinta Hore
- 1da Nofembar: Maalinta ugu dambaysa si aad u codsato QOF AHAAN ka cod-bixiyaha maqan.
- 2da Nofembar: Maalintii ugu dambaysa ee calaamadda boostada cod-bixinta. Waa inay helaan guddiga doorashada ee degaanka ugu dambayn 9ka Nofembar. Waraaqaha Cod-bixiyaha Militariga waa inay helaan ugu dambayn 15ka Noofambar.
- 2da Nofembar: Maalintii ugu dambaysa si aad ugu dhiibto SHAQSI AHAAN codbixinta Guddiga Doorashada ee degaanka ama goob kasta oo cod-bixin ah oo ku taal degmadaada.

Isku diiwaangeli si aad u codayso

- Guddida Doorashooyinka NYS: www.elections.ny.gov/VotingRegister.html
- Guddida Doorashooyinka NYC: vote.nyc/page/register-vote
- Iska diiwaangeli onlayn (haddii aad haysato Ruqsada Darawalka NYS, Oggolaan ama Aqoonsi Aan Darawal ahayn): voterreg.dmv.ny.gov/MotorVoter

Xuquuqdaada xaga cod bixinta


- Cod bixiyayaashu waxay booqan karaan MID KASTA oo Xarumaha Codaynta Hore ah gudaha wadanka halka ay degen yihiin, laga reebo Magaalada New York, halka cod bixiyayaasha loo magacaabay hal cinwaank ilaa HAL goob codaynta hore ah.
- Haddii aad rumeysan tahay cod-bixiye xaq u leh oo aad isdiiwaangalisay waqtigii lagu codeyn lahaa, laakiin magacaaga aan laga helin liiska cod-bixiyayaasha, waxaad codsan kartaa warqadda ku-meel-gaarka ah ama dhaarta.
- Ma bixinaysid Aqoonsi xaga laga codaynayo xataa haddii aad tahay cod bixiyahii u horeeyay.
- Weli waad codayn kartaa haddii aad la kulmayso hoy la'aan.
- Duruufaha qaarkood, weli waxaad u qalmi kartaa inaad codayso haddii lagu helay dembi.
- Wax badan oo shuruudaha u qalmida ah: nyccfb.info/nyc-votes/how-to-vote/know-your-rights
- Qaar ka mid ah shaqaalaha gobolka New York State ayaa u qalma inay helaan illaa laba saacadood lacagta shaqada lagu siiyo si ay u codeeyaan. Fiiri bal inaad uqalanto: www.elections.ny.gov/NYSBOE/elections/TimeOffToVoteFAQ.pdf



Dhaqaalaha ^{1/2}

Gargaarka Musiibada SBA ee New Yorkers oo ay saameysay Duufaanta Hurricane Ida

- Maamulka Ganacsiga Yaryar wuxuu bixinayaa amaahda loogu talagalay masiibada oo dulsarkoodu hooseysa oo la siinayo ganacsiyada Gobolka New York ee ay saameysay Duufaanta Hurricane Ida.
- Ganacsiyada iyo ururada aan macaash doonka ahayn ee cabbir kasta leh waxay qaadan karaan dayn gaaraysa ilaa \$2 milyan si ay u dayactiraan ama u beddelaan hantida musiibada burburisay ama ku burburtay, mashiinnada iyo qalabka, alaabada, iyo hantida kale ee ganacsiga.
- Codsadayaashu waxay ku codsan karaan qatka internetka iyagoo adeegsanaya Codsiga Amaahda Elektiroonigga ah (ELA) iyagoo galaya bogga internetka aaminka ah ee SBA ee disasterloanassistance.sba.gov, waana inay ku codsataa sida ku cad bayaankii SBA #17147.
- Ganacsi iyo shakhsiyaadka ayaa sidoo kale laga yaabaa inay helaan macluumaad iyo codsiyo amaah ah iyagoo wacaya Xarunta Adeegga Macmiilka ee SBA 1-800-659-2955.



Furaha NYC

- Laga bilaabo 17ka Agoosto, dadka ka weyn 12 sanoo waxay u baahan yihiin inay tusaan caddayn ugu yaraan hal qiyaas tallaalka COVID-19 oo loogu talagalay cuntada gudaha, jirdhiska gudaha, iyo madadaalada gudaha Magaalada New York. Sidoo kale tan waxay ka dhigan tahay in shaqaalaha goobahan ay u baahan yihiin in la tallaalo. Sharcigan ayaa dhanqalkiisa bilaaban doona 13ka bisha Sebtember.
- Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah iyo boorarla turjumay iyo hagaha loogu talagalay ganacsiyada yaryar, booqo nyc.gov/keytonyc.

Deeqda ka Soo-kabashada Ganacsiga Yaryar ee Safmarka NYS

- Dowladda Gobolka New York waxay ku dhawaaqday barnaamij deeq ah oo loogu talagalay ganacsiyada yaryar ee uu saameeyay cudurka faafa ee COVID-19 oo shaqeynayay 1da Maarso 1, 2019 ama ka hor. Qaddarka lacagta deeqda ayaa u dhexeeya \$5,000 ilaa \$50,000 iyada oo ay kuxiran wadarta guud ee rasiidyada ee 2019.
- Codsiyadu hadda wey furan yihiin! Ka codso barta nysmallbusinessrecovery.com
- Deeqda waa in loo adeegsadaa Khasaaraha ama qarashyada la xiriira COVID-19 ee soo baxay intii u dhaxeysay 1da Maarso, 2020 iyo 1da Abriil, 2021.
- Si aad u hesho urur deegaankaaga ka jira oo si bilaash ah kaaga caawiya arjigaaga: nysmallbusinessrecovery.com/partners/county

Lacag Baaq Canshuur ee ku Noqoshada-Shaqada Makhaayada

- Makhaayadaha yar yar, oo si madaxbanaan loo leeyahay ee ku dhexyaal Degmada New York ama aag kasta oo ka tirsan Gobolka New York oo ay u qoondeysay Waaxda Caafimaadka ee NYS inay yihiin Aag Oranji ama Aag Gaduud ugu yaraan 30 maalmood oo xiriir ah.
- Barnaamijkan \$35 milyan ah wuxuu dhiirgelin siinayaa makhaayadaha ay saameysay COVID si shaqaalaha makhaayadaha loogu celiyo shaqo, iyo in la kordhiyo shaqaaleynta makhaayadaha ku yaal Gobolka NYS.
- Ganacsiyada u qalma waxay xaq u leeyihiin baaq canshuur ah \$5,000 shaqaale kasta oo cusub oo la shaqaaleysiiyo, illaa \$50,000 ganacsi kasta.
- Faahfaahin dheeraad ah booqo: esd.ny.gov/restaurant-return-work-tax-credit

Barnaamijka Adkaysiga Makhaayadaha ee Gobolka NYS

- Lacag gaaraysa \$25 milyan oo deeq ah oo lagu taageerayo maqaayadaha cuntada siiya bulshooyinka dhibaataaysan iyo kuwa aan matalin.
- Deeq lacageed ayaa u oggolaan doonta makhaayadaha inay isaga dabiraan kharashyada cuntada, diyaarinta iyo gaarsiinta cuntada ee dadka nugul.
- Si aad u hesho ilo ganacsiyada yaryar loogu talagalay, booqo nyic.me/2SznL6Q

Dhaqaalaha ^{2/2}


Arjiyada Sanduuqa Shaqaalaha ee laga reebay ayaa hadda furan!

Barnaamijki wadanka u horeeyay ee siin doona caawimo lacag caddaana ah shaqaalaha aan u qalmin dheefaha shaqo la'aan gobolka ama dakhliga gargaarka federaaliga ah ee COVID- la xidhiidha.

Sanduuqa maaliyada Shaqaalaha Laga reebay

- Gobolka New York waxa uu dhinac u dhigay \$2.1 balyan si loo siiyo lacag bixinta hal wakhti ooo hore lacag bixin dhaqan gal ahayd (ilaa muddada Maarso 27, 2020 ilaa Abrill 1, 2021) shaqaalaha u qalma ee waayo shaqooyinkooda ama dakhliga muddada safmarka COVID-19.
- Araajiyada ayaa hadda ka furan boggan dol.ny.gov/EWE
 - Caawinaad dhanka buuxinta arjiga waxaa laga heli karaa in ka badan 60 urur oo ka jira bulshada dhexdeeda oo ku baahsan Gobolka New York. Booqo dol.ny.gov/CB0list si aad u hesho liis buuxa oo ah ururada lagu kalsoon yahay ama wac [877-393-4697](tel:877-393-4697) si aad ula hadasho wakiil oo aad u hesho meel kuu dhow.
- Si aad ugu qalanto, waa inaad:
 - Noqo qof degen New York
 - Degenaa New York ka hor Maarso 27, 2020
 - Waayay mushaharkii ama dakhliga ka dib Febraayo 2020 iyaddoo ay sababtay:
 - Shaqo la'aanta la xidhiidha COVID-19, shaqo la'aanta qayb ahaaneed, ama kartida in la shaqeeyo
 - Dhimashada la xidhiidha COVID-19 ama naafanimada ee qofka qoyska u shaqeeya ama isha wayn ee qoyska ee dakhliga.
 - Uma qalmo Caymiska Shaqo la'aanta ama federaalka ee gargaarka dakhliga la xidhiidha COVID-19.
 - Ma shaqaysan wax ka badan \$26,208 gudaha 12 bilood ka hor taariikhda dhaqan galka ah ee sharciga ah

- Shaqaalaha u qalmi doonaa ila ahal ama laba qaybood oo dheefaha ah:
 - Safka Kow: \$15,600 wadarta dheefta ka hor cashuuraha (la mid ah \$300/ todobaadkii in ka badan muddo 52 todobaad ah)
 - Safka Labba: \$3,200 wadarta dheefaha ka hor cashuuraha (la mid ah tiirada lacagta jeegaga saddexda ah ee kaalmada federaalka)
- Macluumaadka dheeraadka iyo waxa ka soo kordha hirgelinta sharciga: fundexcludedworkers.org



Dhamaadka Manfacooyinka Dadka Baalgamuudada iyo Manfacooyinka Cudurka Safmarka ee Federaalka

- 5at Bisha Sebtember, 2021 barnaamijyo dhowr ah oo ah manfacyada dadka baalgamuudada federaalka ayaa dhici doona dalka oo dhan, sida uu dhigayo sharciga federaalka. Barnaamijyada manfacyada federaalka ee dhici doonaa waa:
 - Kaalmada Shaqo La'aanta Faafa (PUA)
 - Mushaharka Baalgamuudada Gurmada Degdegga ah (PEUC)
 - Manfacyada Dheer (EB)
 - \$300 Mushaharka Baalgamuudada ee Federaalka (FPUC)
- Manfacyada Caymiska Baalgamuudada (UI) ayaa la sii wadi doonaa in la siiyo codsadyaasha u qalma.
 - Si laguugu tixgeliyo inaad u qalanto UI wixii ka dambeeya 5ta bisha Sebtember, 2021, codsadu waa inuu shaqo la'aa oo uu ahaadaa 26 toddobaad ee ugu horreeya (ama 104 maalmood oo bilaabanaya) manfacyada.
- Wixii macluumaad oo dheeraad ah, booqo dol.ny.gov/fedexp.

Garo Xuquuqdaada



Xubnaha bulshadda iyo isbahaysiga waa inay ogsoonaadaan xuquuqahooda mar kasta oo ay la macaamilayaan Socdaalka iyo Dhaqan Gelinta Kastamada (ICE) ama sharci fulinta kale.

La macaamilka ICE

- Haddii ICE ay kuu soo dhawaadaan adiga ama qof aad garanayso, qor waxa soo socda:
 - Goortee iyo halkee ayay ka dhacday?
 - Sidee ayay u soo bandhigeen nafahooda wakiilada ICE?
 - Miyay iska dhigeen booliska ama ma diideen inay nafahooda aqoonsadeen?
 - Maxay wakiilaa ICE yidhaahdeen?
 - Miyay been sheegeen si ay u soo galaan guri, baqdin geliyeen qofna, ama isticmaaleen xoog hadal ama jidh ah?
 - Miyaa oggolaanshe la siiyay?
 - Haddii aan wax oggolaanshe ah la bixin si aad u gadho ama u raadiso, sida wakiilada ICE ay u falceliyeen?
- Maacaamilid kasta oo sharci fulinta ama socdaalka, dhaqmaada ugu muhiimsan ee la xusuusanayaa waa:
 - Is deji
 - Aamus (ha sheegin halka aa dku dhakatay ama sida aad ku soo gadhay Maraykanka)
 - Diiwaan geli faahfaahinta iyo magacyada
 - HA ordin
 - Waydii inaad la hadasho qareenkaaga ka hor saxeexida dhokumenti kasta ama uu ka jawaab su'aalo kasta.
 - Haddii aanad hadal, been ha sheegin.
 - Gurigaagu waxa uu leeyahay ilaalintiisa gaarka ah ee aanay meelaga dad waynahu lahayn. Fahanka faraqa u dhexeeya meesha dad waynaha iyo meesha gaarka ah waxay kaa caawin kartaa dhaafida iska hor imaadyada walabahaarka ah ee sharci fulinta laanta socdaalka kuu dhow adiga, iyo suuragal ahaan inaad iska ilaaliso waxyeelada.

Sensitive Locations

- Waxaa jira noocyo gaar ah oo meelo ah iyo xaalado halka ICE caafi ahaan aanay ka samayn sharci fulinta socdaalka. Tan waxaa loogu yeedhaa "goobo xasaasi ah."
- Tusaalooyinka goobaha xasaasiga ah waxaa ku jira: dugsiyada, cusbitaalada, goobaha diinta; iyo xafladaha dad waynaha sida aroosyada, banaan baxyada dad waynaha, aasaska.
- Waa muhiin in la ogaado in ay tahay siyaasada ICE oo ay isbeddeli karaan wakhti kasta.
- Diisambar 15, 2020, Badhasaab Cuomo waxa uu saxeexay Xeerka Ilaaliya Maxkamadaheena si wax looga qabto walaacyada soo jitamayay ee sharci fulinta socdaalka ee federaalka ka horjoogsanaayay muhaajiriinta inay soo hor istaagaan maxkamaddaha, ay ku jiraan Maxkamaddaha magaalada iyo Degmooyinka kale.
- Hadda, ICE in dheeraad ah ma xidho dadka maxkamadaha gobolka, magaalada, iyo degmadda, oo in dheeraad ah ma xidhaan dadka tegaya ama ka baxaya gobolka, magaalada ama maxkamaddaha degmadda iyagoon haysan warqadda yeedhamada garsooreed.

Si aad uga warbixiso weerar, soo wac Mashruuca Difaaca Muhaajirka (IDP) at [212-725-6422](tel:212-725-6422).

Macluumaadka dheeradka ah iyo gudbinaha, soo wac Xafiiska NYS ee Maraykanka Cusub lambarka [1-800-566-7636](tel:1-800-566-7636).

Dembiyada Nacaybka ah

Bilahi u dambeeyay, waxaa jiray warbixino sii kordhayay ee demiyada nacaybka ku lidka ah xubnaha bulshadda muhaajirka.

Waa maxay dembiga nacaybku?

- Dembiga nacaybka waa demb ay dhiirigeliso eexdu.
- Qofku waxa uu galaa dembiga nacaybka marka mid ka mid ah dembiyada ka caddeeyay la galo ee beegsanaya dhibanaha sababtoo ah fikirka ama rumayn ku saabsan isirka, midabka, asalka qaranka, tafiiirta, sinjiga, diinta, ku dhaqanka diinta, da'da, naafanimada ama qaabka galmada, ama marka falkan loo galo iyaddoo ay keentay nooca fikirka la qaba ama waxa laga aaminsan yahay qofka.
- Badhasaab Cuomo waxa uu sameeyay Kooxda hawlgalka Degdega ah ee Dembiyada Nacaynka si ay ula dagaalamaan warbixinaha kordhaya ee eexda oo ay dhiirigeliso hanjabaado, dhibaataayn iyo rabshad ka dhacda Gobolka New York oo dhan.
- Marka laga warbixiyo dembiga nacaybka, dhammaan macluumaadka ku saabsan waayo aragnimadaada, aqoonsiga, iyo waxa kale waxay ahaadaan qarsoodi.

Haddii aad aragto shay ama aad tahay dhibaha dembiga nacaybka, uga warbixi booliska oo soowac Qaybta Xuquuqda Adamaha ee NYS. Soo wac [1-888-392-3644](tel:1-888-392-3644) ama Fariin qoraal ah ugu dir "HATE" lambarka [81336](tel:81336).

Haddii adiga ama qof aad garanayso uu ahaa dhibanah dembiga, Xafiiska NYS ee Adeegyada Dhibanaha waxa uu awoodi karaa inuu kaa caawiyo biilashada caafimaadka iyo la talinta kharashyada, aaska iyo kharashyada geerida aaskeeda, mushaharka lumay, iyo noocyada kale ee caawimada. Soo wac [1-800-247-8035](tel:1-800-247-8035) ama booqo ovs.ny.gov.

Dadka degen NYC iyo wadamada ku xeeran

Gudaha NYC:

- Qareenka dad waynaha
 - [212-669-7250](tel:212-669-7250)
- Qareenka Degmadda Manhattan
 - [212-335-3100](tel:212-335-3100)
 - manhattanda.org/victim-resources/hate-crimes
- Qareenka Degmadda Brooklyn
 - [718-250-4949](tel:718-250-4949)
 - brooklynda.org/hate-crimes-bureau
- Qareenka Degmadda Queens
 - [718-286-6000](tel:718-286-6000)
- Guddida Xuquuqda Aadamaha NYC
 - [718-722-3131](tel:718-722-3131)
 - nyc.gov/cchr
- Aaga Badbaada ah ee Caawimada Dhibanaha
 - [1-866-689-4357](tel:1-866-689-4357)

Ka baxsan NYC:

- Qareenka Degmadda Nassau
 - [526-571-3505](tel:526-571-3505)
 - nassaуда.org
- Qareenka Degmadda Nassau, Xafiiska Arrimahaa Muhaajirka
 - [516-571-7756](tel:516-571-7756)
- Hawl fuliha Degmadda Nassau Laura Curran
 - [516-571-3131](tel:516-571-3131)
- Qareenka Degmadda Suffolk
 - [631-853-4161](tel:631-853-4161)
 - suffolkcountyny.gov/da
- Degmadda Suffolk Waaxda Booliska, Qaybta Dembiyada Nacaybka
 - [631-852-6323](tel:631-852-6323)
- Degmadda Suffolk, Waaxda Arrimaha Dadka laga tirada badan yahay
 - [631-853-4738](tel:631-853-4738)
- Degmadda Westchester, Guddida Xuquuqda Adamaha
 - [914-995-7710](tel:914-995-7710)
 - humanrights.westchestergov.com



Ilaha NYS



Xafiiska NYS ee Maraykanka Cusub

- Haddii adiga ama qof aad garanaysaa uu u baahan yahay caawimada sharciga soo wac khadka tooska ah [1-800-566-7636](tel:1-800-566-7636). Dhammaan macluumaadka wicitaanku waa qarsoodi. Caawimada waxaa lagu heli karaa 200+ luqaddoo.

Waaxda Caafimamadka NYS

- Macluumaadka u dambeeya ee safmarka COVID-19, soo wac khadka tooska ah [1-888-364-3065](tel:1-888-364-3065) ama booqo ny.gov/coronavirus.
- Hel xaqiiqooyinka tallaalka COVID-19 gudaha New Yorka bogga ny.gov/vaccine.
- Codso daboolida caafimamadka: soo wac [1-855-355-5777](tel:1-855-355-5777) ama booqo nystateofhealth.ny.gov.

Xafiiska Caafimaadka Maskaxda NYS

- FSu'aalaha dheeraadka ah ee ku saabsan adeegyada caafimaadka maskaxda ama si aad u hesho adeeg bixiyaha adeega caafimaadka maskaxda, soo wac [1-800-597-8481](tel:1-800-597-8481) ama omh.ny.gov.
- Haddii aad la kullanto walbahaar uu sababo gurmada korona fayraska, soo wac [1-844-863-9314](tel:1-844-863-9314).
- Laynka Qaranka tooska ah ee Ka hortagga Isdilada: Haddii nolohaada ama qof kale noloshiisu ay khatar wayn ku sugan tahay, soo wac [911](tel:911). Haddii aad ku jirto dhib oo aad u baahan tahay caawimo degdeg ah, soo wac [1-800-273-8255](tel:1-800-273-8255) ama fariin Qoraal ah ugu soo dir "GOT5" ilaa [741-741](tel:741-741).
- Rabashada Guriga: haddii adiga ama qof kale uu xidhiidh la leeyaha uu ku maamulayo qof kale hadal, qaab dagaalansan, ama xad gudub galmo, ama farsamooyin kale, soo wac NYS Domestic Violence Hotline lambarka [1-800-942-6906](tel:1-800-942-6906).

Waaxda Shaqada NYS

- Waaxda Shaqada NYS waxaa ka go'an ilaalinta iyo sare u qaadida badbaada shaqaalaha iyo caafimamadka, mushahrka, iyo xaaladaha shaqada.
- Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan mushaharka iyo sharciyada saaada, caafimaadka iyo badbaadada goobta shaqada, ama ku soo xaree cabasho, soo wac [1-888-469-7365](tel:1-888-469-7365) ama booqo dol.ny.gov/safety-and-health
- Wixii ah caawimada Caymiska Shaqo la'aanta, wac [1-888-209-8124](tel:1-888-209-8124) ama booqo dol.ny.gov/unemployment/unemployment-insurance-assistance.

Qaybta Xuquuqda Aadamaha NYS

- Sharciga Xuquuqda Aadamaha New York waxa uu mamnuuca takoorka dhinacyada sida shaqada, guriyaynta, amaahda, waxbarashadda, iyo meelaha hoyga dad waynaha, oo ku salaysan da'da, isirka, asalka qaranka, sinjiga, qaabka galmada, aqoonsiga sinjiga ama muuqaalka, heerka guurka, heerka ciidaanka, iyo dabaqadaha kale.
- Haddii aad dareemayso in lagu takoroay, ku soo xaree cabashada [1-888-392-3644](tel:1-888-392-3644) ama booqo dhr.ny.gov.

Ilaha COVID-19 Magaalada New York

- Dadka degen NYC ee raadinaya adeega adeeg bixiyayaasha ama ilaha kale waxay ka heli karaan diiwaanada hoose:
 - Waxbarshadda: nyic.org/covid-education-resources
 - Shaqada: nyic.org/covid-employment-resources
 - Dhaqaalaha: nyic.org/covid-financial-resources
 - Cuntadda: nyic.org/covid-food-resources
 - Daryeelka Caafimaadka: nyic.org/covid-healthcare-resources
 - Ganacsiga yar: nyic.org/covid-small-business-resources

Haddii aad qabto su'aalo ama faallooyin ku saabsan agabkan ama macluumaadka ku jira, fadlan la xidhiidh:

Bryan Lee
blee@nyic.org

Dokumentiga qatka internetka ka fiiri ama luqado kale iyadoo lagu qoray, booqo nyic.org/KYR ama calaamaddan iskaangaree:



Isbahaysiga Laanta Socdaalka New York (NYIC) waa xeerka dalaayad iyo urur u doodis ah ah oo metela in kabadan 200 oo muhaajiriin ah iyo kooxaha xuquuqda qaxootiga dhammaan New York.

Waxaa noo muuqda Gobolka New Yorka oo ka xoog badan sidii hor esababtoo ah dhammaan dadka waa la soo dhawaynayaa, waxaa loola dhaqmaa si xaq ah, oo waxaa la siiyaa fursada ay ku raacdeeyaan riyooinkooda. Hiigsigayagu waa inaan midayno muhaajiriinta, xubnaha, iyo gaanshaan buurta markaad dhammaan dadka reer New York way samaadaan.



New York Immigration Coalition

131 W 33rd St, Ste 610
New York, NY 10001
212 627 2227
nyic.org

This resource guide
is supported by:

